

LIISKA INAAD XASUUSTO NADAAFADA U DANBEYSA

Waa waajib saaran macmiilka nadiifinta marka uu ka guurayo hoyga si foojigan. Waa inaad hubisaa inta aadabn guurin inaad si wanaagsan aad u nadiifisey waana sida hoos ku qoran qaabka nadaafada u danbeysa loo sameynayo.


Ogsoonow, in

- Haddii aad nadaafada u danbeysa u sameyn sida lagu farey ama aadanba nadiifin ama aad qeyb ka takto, waxaan kuusoo direynaa kharashka ku baxa shaqada xirfadlaha nadaafada sameeyey gebi ahaanteed;
- Haddaad alaab kaga takto hoyga, waa la tuurayaa kharashka faaruqinta hoygana adigaa lagugu soo dalacayaa.


Jikada

- Masax dhamaan meelaha wax la saaro dushooda iyo weliba qalabka ka nadiifi dufanka iyo waxa ku dhagan, sidoo kalena gudahana ka nadiifi.
- Nadiifi makiinada wax lagu karsado, foornada iyo biraha foornada, sidoo kale xasuuso dhinacyada inaad ka nadiifiso.
- Nadiifi marwaxada hawada ee makiinada dusheeda.
- Dhaq talaajada/fintijeerka oo dhalaali qaboojisadana. Ka huufaree habaaska/boorka talaajada gadaasheeda.
- Haddii hoygaagaSATO yaaley qasaalada maacuunta, u nadiifi si taxadar leh.

Nadiifinta hawo-saaraha makiinada cuntada lagu karsado



Dhalaalinta iyo nadiifinta talaagada iyo qaboojiyaha



U foajignow dhalaalinta qaboojisada qalajina barafka dhalaaley markiiba, si uusan dhulka u qoyn Ka bixi bareyska kadibna albaabka talaagada balaq.

Qaboojisada aan la dhalaalin, waxay keeni kartaa fatahaad ama waxyeelo qoyaan, haddaan qof markaas soo dageyn. markiiba heshiiska korontadana ka bax.

Suuliga, musqusha qubeyska iyo sawnada

- Dhaq fadhiga suuliga, tubooyinka iyo saxanka weji dhaqa.
- Dhaq musqushka qubeyska iyo waaskada.
- Dhaq sawnada, xasuuso sidoo kale albaabka sawnada.
- Nadiifi dhulka iyo bulaacada.

Nadiifinta bulaacadaha dhulka



Derbiga iyo dhulka

- Huufaree dhulka, istiraasho yar ku masax derbiyada oo kaga tir wixii ku dhagan.
- Ka nadiifi derbiyada waxa ku yaala iyo hadey sharootooyin ku dhagan yihiin.
- Nadiifi kanaalada hawada ay ka baxdo.
- Tirtir damiye daaraha nalka.
- Tirtir muraayadaha agabka dhalooyinka.


Daaqadaha iyo albaabaadka

- Dhaq daaqadaha.
- Nadiifi albaabaadka iyo gaanjooyinkooda.

Goobaha kale

- Faaruqi oo nadiifi qolka dharka iyo armaajooyinkaba.
- Hagaaji oo faaruqi balakoonka iyo baqaarka alaabta.

Nadiifinta filtaraha hawo-bedelaha



Faaruuqinta guriga

